
Akhrinta Alt MCA Warbixinta Ardayga Shakhsi ahaaneed (ISR) Tilmaamaha Degdegga ah

Warbixinaha Ardayga Goonida ah (ISR-yada) waxaa loo sameeyaa arday kasta oo la filayo inuu qaato imtixaan heer qaran ah. ISR wuxuu bixiyaa macluumaad ku saabsan waxqabadka ardayga iyo barashada heerarka tacliinta ee Minnesota.

Imtixaanka akhriska ee MCA (Alt MCA) waxaa loo qaadan karaa halkii laga qaadan lahaa MCA ee ardayda qaba naafada garashada ee ugu weyn. Alt MCA waxaa laga bixiyaa fasallada 3-8 iyo 10.

Qof kasta iyo imtixaan kasta wuxuu ku jiraa ISR gaar ah. Haddii ardaygaagu uusan ka qaybgelin imtixaanka, warbixinta ISR-ka waxay muujin doontaa sababta natiijooyinka aan loogu darin (tusaale ahaan, maqnaansho ama in ardayga imtixaanka idil sameynin).



1. Macluumaadka ardayga — Magaca ardayga, fasalka, Iskuulka, degmada, sannadka imtixaanka iyo qiimeynta.
2. Qaabka Maamulka —MCA-da Reading Alt waxaa lagu bixin karaa internetka, warqad, ama labadaba. Habka uu ardaygaagu u galayo imtixaanka waa la muujiyay. Haddii imtixaanka ardaygaaga la joojiyay kahor inta uusan dhammaan, taasna sidoo kale waa lagu muujiyay halkan.
3. Helitaanka Qoraalka Akhriska—Waxaa lagu daray sharaxaad ku saabsan sida ardaygaagu u helay ama u isticmaalay qoraallada akhriska intii lagu jiray maamulka imtixaanka.
4. Guud ahaan Natiijooyinka—Sharaxaad ku saabsan waxqabadka iyo heerka barashada ardaygaaga ee heerarka la ballaariyay (extended benchmarks) ee Heerarka Waxbarasho ee Minnesota.
5. Heerka waxqabadka—Jaantuska garaafka wuxuu muujinayaa dhibcaha guud ee ardaygaaga iyadoo lagu saleynayo heerarka waxqabadka. Waxaa jira afar heer oo waxqabad ah: Waxbarashada bilowga ah, dhexe, heerka koowaad, iyo heerka sare.
6. Guudmarka Qiimaynta Akhriska Cusub—Fiidiyowga guud ee qiimaynta akhriska cusub waxaa lagu heli karaa iyadoo la baarayo koodhka QR ee ku jira warbixinta.

Macluumaadka loogu talagalay ardayda iyo qoysaskooda waxaa laga heli karaa bogga internetka ee **MDE Statewide Testing Students and Families** bogga internetka (education.mn.gov > Students and Families > Programs and Initiatives > Statewide Testing).

Alt MCA R Gr 5

7

Grade 5 Reading Alt MCA: Percentage of Students Demonstrating Proficiency

In spring 2026, **45%** of the grade 5 students in Minnesota who took the Reading Alt MCA performed at the meets and advanced levels. Performing at these levels demonstrates proficiency in the knowledge and skills described in the extended benchmarks from the Reading strand of the Minnesota Academic Standards in English Language Arts.



Performance Related to Cognitive Complexity

On the Reading Alt MCA, each task has three questions that have an increasing level of cognitive complexity. Question complexity can depend on many variables, including how many answer options there are and how much support the question provides with pictures or graphics. This section shows how your student is doing on questions with increasing levels of complexity. Complexity levels are reported as points earned out of points possible.

8 9 10

Complexity Level	Content Descriptions	Points Earned/ Points Possible
Low	Questions at this level generally require students to: • Identify specific words or pictures from the text to answer questions. • Identify the problem in the text. • Match a word to the picture of that word. • Identify a picture that supports information found in the text. • Identify an event in the text from a firsthand account (someone who personally experienced the event).	5 / 9
Middle	Questions at this level generally require students to: • Quote a basic phrase from the text to answer questions. • Identify how a problem in the text gets solved. • Determine the meaning of a given word. • Describe a picture found in the text. • Identify an event in the text from a secondhand account (someone who didn't personally experience the event).	4 / 9
High	Questions at this level generally require students to: • Find a direct quote that helps answer a question about the text. • Describe how a problem is solved in the text. • Determine the meaning of a given phrase. • Explain what information is shown in a picture from the text. • Describe an event in the text from a firsthand account (someone who personally experienced the event) or secondhand account (someone who didn't personally experience the event).	3 / 9

11 **How to request this report in a translated language or an alternative format:**
If a QR code is present on the report, you can access a video available in ten translated languages. This ISR may also be made available in another translated language or an alternative format, such as large print, braille, or as an audio file. Contact MDE by email at mde.testing@state.mn.us or by phone at 651-582-8674.TTY users may call the Minnesota Relay Service at 711.

7. Aqoonta heerka gobol—Heer gobol, boqolkiiba ardayda muujinaya aqoonta heerka fasalka. Dhibcaha heerarka waxqabadka ee Meets iyo Advanced waxay muujinayaan aqoonta.

Waxqabadka la xiriira isku-dhafka garashada

8. Heerka dhibcaha —Hawlaha akhriska ee Alt MCA mid kasta wuxuu leeyahay saddex su'aalood oo leh heerar sii kordhaya oo ah dhibcaha garashada ee hooseeya, dhexdhexaad ah, iyo sare.
9. Qeexida waxyaabaha ku jira —Qeybtan waxay muujineysaa sida uu ardaygaagu uga jawaabo su'aalaha oo heerarkooda adag ay kordhayaan.
10. Dhibcaha la kasbaday/Dhibcaha la heli karo —Dhibaato kasta, waxaa la sheegayaa tirada dhibcaha la kasbaday ee dhibcaha la heli karo.
11. Macluumaadka Xiriirka—Si aad u codsato warbixinta qaab kale ama luuqad la turjumay, fadlan la xiriir Waaxda Waxbarashada ee Minnesota adigoo soo diraya emayl mde. testing@state.mn.us, telefoon 651-582-8674, ama booqo MDE Statewide Testing bogga internetka (education.mn.gov > Districts, Schools and Educators > Statewide Testing > Teaching and Learning > Statewide Testing).